FSNAU
Qaybta Falanqaynta Sugnaanta Cuntada iyo Nafaqada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

Waxaa lasoo saaray Bishii 11aad, 2010

## Warbixin Gaar ah - Qaylo-Dhaanta Xilliga Deyrta

Cimilada

Suuqyada

Nafaqada

Beeraha

Xoolaha

Colaada Sokeeye

Arrimaha Gobolka ee Soo Shaacbaxaya

Iskudhafka Falanqaynta Sugnaanta Cunnada

### NATIIJOOJINKA UGU MUHIIMSAN

Xaaladda cuntada ee dhamaan Soomaaliya wali waa sidii lagu faahfaahiyay warbixintii xilliga ka dambeeya gu'ga (Bishii 8aad 2010). Habnololeedka diil-webi Juba, oo dalaggii gu'ga ay waxyeeleeyeen daadadkii bishii 5aad 2010ka, waxa ka soo go'ay dalag daba maray xilligiisii bishii 9aad ee sannadkan, kaasoo mag dhabay khasaarihii hore. Hase ahaatee, inkasta oo ay jiraan ififaalo wanaagsan oo tilmaamaya cunno helid suagan iyo nafaqo ah, haddana **wajiga *Gurmadka Banii'aadminnimo*** weli wuu kasii jirayaa ilaa dhammaadka sanadkan, iyada oo ay jiraan dhibab badan oo si fudud dib u baabi'in kara soo roonaanshaha aan adkayn ee gobolka (dhacdada *La Niña*, Iskahorimaadyada, iwm). Xaaladda cuntadu ayaa kasoo raynaysa habnololeedka beer-xoolo dhaqatada ee Waqooyi-Galbeed oo dalag fiicani u soo go'ay xiligii Gu'ga/Karanta ee 2010. Dalagan oo lagu qiyaasay inuu yahay mid aad u badan ahna kii ugu badnaa tobankii sanadood ee u dambeeyay, ayaa xoojinaya cunno helidda habnololeedka. Haddaba, roobkii Dayrta oo intii caadiga ahaa ka yar ayaa ka da'ay Soomaaliya oo dhan bishii Oktoobar, arrintaas oo lala xiriirin karo dhacdadii *La Niña*. In kastoo waxyeelada roob yarida aanay weli muuqanin, haddii ay xaalada roob la'aantu sii jirto xilligan Deyrta, waxay keeni doontaa daaqa iyo biyaha oo si dhakhso ah u dhammaada waxay kaloo saamayn doontaa wax soo saarka dalagga, taas oo si tartiib-tartiib ah dib u celin doonta isasoo tarkii sugnaanta cunnada ee labadii xilli ee dambaysay.

**Cimilada:**
Guud ahaan Koonfurta iyo badhtamaha Soomaaliya waxay ku jiraan xiligii roob la'aanta ee Xagaaga, marka laga reebo xeebaha gobollada Shabeelle iyo Jubba, habnololeedyada beer-xoolo dhaqatada ee gobolka Baay iyo qaybo ka mid ah habnololeedka Digir Tacbatadaee Badhtamaha ooy roobabka Xagaagu ka da'een bilihii 7aad-8aad. Xagga waqooyiga, Karan fiican ayaa ka da'ay Awdal iyo Waqooyi Galbeed, sidoo kalena gobolka Sanaag ee abaartu saameysey ayaa isaguna helay karan fiican tobankii danbe ee bishii 8aad. Roobabkii Dayrta oo soo hormaya ayaa billabmay bartamihii bishii 9aad, oo inta badan ka da'ay deegaannada miyiga intiisa badan ee Waqooyi Galbeed iyo qaybo ka mid ah Waqooyi Bari. Hase ahaatee, bishii 10aad roobabkii Dayrtu waxay ahaayeen kuwo goosgoos ah oon macno lahayn gabi ahaanba Soomaaliya, taas oo noqon karta astaan muujinaysa dhacdada *La Niña*.

**Colaadda sokeeye:**
Colaadda sokeeye iyo iskahorimaadyadu weli waa arrimaha ugu waawayn ee wiiqaya xaaladda nololeed iyo sugnaanta cuntada ee Soomaaliya. Dagaallada u dhaxeeya kooxaha isku haya Koonfurta iyo Badhtamaha dalka qaybo ka mid ah xilligan warbixintan la qorayo (bilihii 7aad-10aad 2010) waxay keeneen khasaare naf iyo maalba leh, burburka dhismayaasha iyo agabka igaarsiinta, khalkhalka hawlihii ganacsiga iyo dhaqaalaha iyo baro-kaca bulshada. Dhacdooyin aan badnayn ayaa laga soo xog bixiyay Waqooyiga marka loo barbar dhigo qaybihiisa kale ee dalka. Sida ku cad warbixinta guddiyada wadajirka ah ee hay'adaha ee la xidhiidha dhaqdhaqaaqa dadka, qiyaastii 1,050,000 qof ayaa baro-kacay intii u dhaxaysay bishii 7aad-10aad. Qiimeyntii bulshada ee ugu dambeysay ee ay soo saarto Hayadda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay HQQM) (bishii 9aad 2010) ayaa tirada dadka barakacayaasha ka badashay tiradii hore ee ahayd 1.41 malyuun oo hadda gaadhay 1.46 malyuun oo qof. Korodhka tirada waxa lala xidhiidhinayaa korodhka barakcayaasha ee afaafka Afgooye.

**Beeraha:**
Qiimeynta dalagga ee FSNAU (Bishii 9aad 2010) aayaa qiyaastay xilli dambeedka gallaydii iyo dalagga iibka loo beerto (Sisinta & Digirta) la goostay uu fiicnaa diisha wabiga ee gobollada Jubbooyinka. Qiyaastii 84% gallaydii xilli danbeedka waxay ka soo go'ay Jubbada Dhexe. Ururka Cuntada iyo Beeraha (FAO) oo ay kala qayb galeen FSNAU, WFP, iyo Wasaaradda Beeraha ee Somaliland ayaa waxay qiimayn ku sameeyeen dalagga xilliga Gu'ga/Karanta beer-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed bishii 10aad 2010. Intii ay socotay qiimeyntani waxa la adeegsaday *Qalabka Sawir ku Qiimaynta* si loo qiyaaso dhalmada dalagga. Natiijadii qiimeyntu waxay muujisay in habnololeedku ay ka soo go'een xilligii Gu'ga/Karanta dalag aad u fiican oo firiley ahi (79,000Mt). Dhul diyaarin iyo jilaal abuur ayaa ka socday Koonfurta iyo Badhtamaha tan iyo billowgii hore ee bishii 9aad. Hase ahaatee, roobabka Dayrta oo baaqdaa waxay saamayn karaan dhalashada abuurka, gaar ahaan beer-xoolo dhaqatada.

**Xoolaha:**
Xaaladaha daaqa iyo biyuhu way fiican yihiin inta badan meelaha xoolo dhaqatada iyo beer-xoolo dhaqatada ee Waqooyi Galbeed ooy ugu wacnayd wadajirka waxtarkii roobabkii Gu'ga ee fiicnaa iyo Karanta oo waqti dheer da'aysay iyo roobabkii Deyrta ee soo hormaray bishii 9aad. Waxaa kaloo lagusoo war bixiyay in xaaladaha biyaha iyo dhul-daaqsimeedka ee xeebaha iyo dhulalka u dhow-dhow ee gobollada Shabeelle iyo Jubba ay soo wanaagsanaatay roobabkii Xagaaga oo fiicnaa awgood. Hase ahaatee, deegaannada xoolo-dhaqatada Bartamaha iyo Koonfurta badankoodu waa qallayl xilligii Xagaaga, roobabkii Dayrtuna dib ayay u dhaceen. Dhoofka xooluha aad buu u kordhey xilligan Xajka iyagoo ka sare maray intii la dhoofiyey sanadkii hore xilligan oo kale. Korodhka dhoofka xoolaha ee sanadkan waxa loo sababaynayaa xayiraadda ay dalalka Gacanku ka qaadeen xoolaha Soomaalida bishii Oktoobar 2009 iyo sidoo kale hawlaha maxjarrada xoolaha ee dekedaha Berbera iyo Boosaaso ee la kordhiyay.

Xilliga Jiilaalka | Roobabka Guga | Xilliga Xagaaga | Roobabka Deyrta

Jan 2010 | Feb | Mar | Apr | May | Jun | Jul | Aug | Sept | Oct | Nov | Dec 2010

Jiilaal yara qabow iyo roobab ka da'ay meelo badan oo Soomaaliya ah; Beerasharada xilliga Guga oo ka billabatay Wqooyiga iyo koonfurta

Xilil roobeed yara wanaangsan; xaaladda sugnaanto cunno oo yara hor martay; Laakiin 2 malyuun oo qof oo tabaalaysan.

Soosaarka xilli roobaadka gobollada Jubbooyinka oo wanaagsan; Tirada barakacayaash (IDP) oo sare u kacday; Dallag goosashada Xilliga Guga/Karanta oo aad u wanaagsanayd

Curashada roobabka Deyrta oo dub u dhacday inta badan waddanka; Beeridda ka hor xilli roobaadka oo ka billaabatay dhamaan dhulak wax soosaarka ee Koonfurta

Taxanaha Xilliyada iyo Arrimaha ugu Waaweyn ee Dhacay

FSNAU - Somalia
United Nations Somalia, Ngecha Road Campus
Box 1230, Village Market, Nairobi, Kenya
Tel: +254-20-4000500
Cell: +254-722-202146 / 733-616881
Fax: +254-20-4000555
Email: info@fsnau.org
Website: www.fsnau.org

**Suuqyada:**

Shilin Soomaaliga iyo shilinka Somaliland labaduba way xoogaysteen marka loo eego Doollarka Mareykanka laga soo bilaabo Juunyo 2010, taas oo ay keentay lacagaha la soo xawilayay Ramadaanta iyo Ciidul Fidriga awgeed iyo lacagta adag ee ka soo xaroota xoolaha la dhoofinayo xilliga Xajka. Qiimaha badeecadaha la soo dejiyo badankoodu (saliidda, sonkorta, bariiska, burka) waxoogaa ayay kordheen bilihii 7aad - 9aad 2010 suuqyada Soomaaliya badankooda taas oo ay sababtu tahay wax soo dejinta oo yaraatay xilliga bad-xidhanka (bsihii 6aad - 9aad). Labada bilood ee soo socda qiimaha badeecadaha la soo dejiyo ee Soomaaliya waxa xukumi doona, xaddiga badeecadaha la soo dejiyo, isu kala socodka badeecadda ee dalka gudihiisa, iyo dhaqanka sicirka suuqa addunka oo ay ka muuqato sicirka bariiska ee sii kordhaya. Tusaha Sicirka Wax-iibsiga (CPI) ayaa muujiyay kordhaya si u dhaxeysa waxaan la sheegi karin ilaa heer dhex-dhexaad ah gebi ahaanba Soomaaliya bilihii 7aad - 9aad 2010, taas oo inta badan ay sabab u tahay qiimaha kordhay ee sonkorta, burka iyo massagada/hadhuudhka.

**Nafaqada:**

Natiijooyinka sahankii nafaqada ee gobolka Sanaag bishii Oktoobar ay ka sameeyeen FSNAU/UNICEF/International Medical Corps waxay muujinayaan heerka **Digniinta** ee laga billaabo falanqayntii isku dhafnayd ee Gu'ga 2010 dabadii oo heerka Caalamiga Nafaqo-la'aanta Ba'an (CNB) oo ahaa **>8.5%** (Pr= 0.90) iyo heerka darraansha nafaqo-la'aanta ba'an (DNB) oo ahaa **>0.6%** (Pr= 0.90). Marka dib loo fiirsho heerka dhimashada aan kala sooca lahayn oo ahaa **0.35** (0.14-0.86) dhimasho/10,000 qof/maalintii ayaa wax shan sano ka yar dhimashadooda lasoo sheegin, waxayna taasi muujinaysaa in xaaladdu tahay mid la ***Aqbalikaro*** marka lagu qiimeeyo qiyaasta WHO. Qiimeyn degdeg ah oo nafaqada ah oo laga sameeyay bishii 10aad 2010 xoolo-dhaqatadii cayrowday ee Waqooyi Bari ayaa muujiyay in xaaladdooda nafaqo tahay mid la ***Aqbalikaro*** laakiinse halis ugu jira in ay ka sii darto marka la eego saamiga weyn ee dadka ee adeegsanaya tababaha la tacaalidda nolosha oo qalafsan.

Falanqaynta nafaqada ee isku dhafan ee FSNAU ee Gu'ga 2010 dabadiiayaa muujisay in bulshada diil-webi Jubba ahaayeen heerka nafaqadooda mid ***Aad u Ba'an***. Xogaha tirada caruurta soo gaaraya xarumaha caafimaadka ee korriinka carruurta la socda iyo kuwa quudintu muujinaysaa uu aad u sarreeyo, balse au hoos u dhacayso titada caruurta nafaqo-la'aanta ba'ani hayso saddexdii bilood ee u dambeeyay.

**Magaalooyinka:**

Falanqeynta haatan ee magaalooyinku kama muujinin wax is beddel ah oo muuqda xagga sugnaanta cuntada iyo hab-nololeedka magaalooyinka intii ka dambeeysay warbixintii u dambeysay (Bishii 1aa - 6aad 2010). Waxa jira waxyaabo muujinaya in sugnaanta cuntada ee magaalooyinka gobollada Shabeelle iyo Jubba ay soo wanaagsanaanaysay intii u dhaxaysay bilihii 7aad - 9aad oo awoodda wax-iibsiga ee bulshadu uu si wax ku ool ah isu soo tarey sababtuna ay tahay qiimaha firileyda oo hoos u dhacay iyo mushqaayada/ujuurada muruq-maalka oo kordhay. Sicirka firida dalka ayaa hoos u dhigay kharashka nolosha. Hase ahaatee, xaaladda meelaha kale waxba iskama ay beddelin tan iyo intii falanqayntii Gu'ga 2010 dabadii. Kharashka ugu Yar ee Nolosha (KhYN)ee magaalooyinkan ayaa sare u kacay 1-8% sicirka masagada/haruurka oo sare u kacay awigeed. Haddaba, kororka KhYN saamayta uu ku yeeshay helitaanka cuntada ee dadka saboolka ah ee ku dhaqan magaalooyinka ayaa waxaa dhexdhexxadiyay korodhka mushqaayada/ujuurooyinka muruq-maalka ee ka jira guud ahaanba Soomaaliya. Badhtamaha Soomaaliya ayaa ka duwan oo ujuurada/mushqaayadda muruq-maalku aanay isbeddelin ama ay hoos u dhacayso, taasoo ay ugu wacan tahay colaadaha soo noq-noqonaysa oo ishortaagay ganacsigii iyo hawlihii suuqa. Marka deegannada la is barbar dhig KhYN ee bilihii 7aad - 9aad 2010 waxa ugu sarreeyay Waqooyi Galbeed halka ay koonfurta ay ugu hoosaysay, oo loo barbar dhigi karo lixdii bilood ee hore ee 2010.

**Miyiga:**

Xaaladda sugnaanta cuntada iyo hab-nololeedka gobolada Koonfurta badankooda waxa ka muuqday ka soo rayn bilihii 7aad-9aad 2010, sida ka muuqata itaalka wax-iibsiga ee bulshdada ee xoogaysanaya. Sidoo kale waxa soo hagaagay isdhaafsiga ganacsiga ee riyaha iyo firileyda iyo sidoo kale mushqaayadda/ujuurada iyo firilayda taas oo ay ugu wacan tahay hawl beereedka ballaaran (xilli dambeedkii Xagaaga, Deyrta) iyo waliba hawlaha gancasiga xoolaha. Waxa kale oo ay xaaladdoodu ka soo raysay diil webi Jubba ka dib markii la goostay dalag xilli-dambeedka ee bishii 9aad, sida ka muuqata isdhaafsiga ganacsiga iyo hoos u dhaca qiimaha firilayda ee suuqyada degaanka iyo sidoo kale tilmaamayaasha nafaqada oo isa soo tarayey.

Gobollada dhexe, xaaladda sugnaanta cuntada ee deegaannada xoolo-dhaqatada Hawd iyo Addun ayaa waxaa ka muuqda ka soo rayn tan iyo Gu'gii 2010 sida ka muuqata korodhka dhalmada idaha iyo riyaha iyo qiimaha xoolaha. Hase ahaatee, dhinaca habnololeedyada Deexda iyo Digir Tacbatada wax isasoo tar ah (ka soo reyn) ahi kama muuqdo tan iyo Gu'gii 2010 maaddaama aan wax roobab ahi di'in xilligii Xagaaga, halka roobabkii Dayrtuna aanay weli bilaabmin. Waxaase kor u kacay qiimaha adhiga xilliga Xajka awgii, arrintaas oo si wax tar lihi saamayn ugu yeelatay awooddii wax-iibsiga sida kororka isweydaarsiga ganacsiga ee riyaha dabaaxa iyo bariiska uu muujinayo..

Xagga Waqooyiga, xaaladda sugnaanta cuntada ee xoolo-dhaqatada iyo beer-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed way ka soo raysay iyadoo ay ugu wacan tahay wadajirka waxtarka lihi ee xilligii Gu'ga 2010, roobabkii Karanta oo fiicnaa iyo roob horaadkii Dayrta oo dhex dhexaad ah oo la helay bishii 9aad 2010. Roobabku waxa ay saameyn wanaagsan ku yeesheen biyaha iyo baadka iyo xaaladda xoolaha iyo caanaha ee deegaanadaasi. Waxa intaa dheer, dalag badan oo ka soo go'ay dhulka beer-xoolo-dhaqatada ayaa sahashay helitaanka firilayda ee gobolka. Hase ahaatee, xaaladdu aad bay uga sii daraysaa Dooxada Nugaal, oogada Sool ee gobollada Sanaag iyo Sool, xoolo-dhaqatada Addunka iyo Deexda roob la'aanta jirta awigeed.


## WAXYAABAHA UGU MUHIIMSAN QAYBAHA

### CIMILADA

***Xaddiga Roobka***

Koonfurta-Battamaha Soomaaliya guud ahaan wax roob ahi kama di'in xilligii Xagaaga (Bishii 7aad-9aad). Hase ahaatee, bishii 7aad ayaa roobabka Xagaagu ka da'een xeebaha gobollada Shabeelle iyo Jubba, gaar ahaan degmooyinka Jowhar, Balcad (Shabeellaha Dhexe) Jamaame, Jilib, Kismayo iyo Badhaadhe (Jubba). Roobabku waxay kaloo ka da'een gobolka Baay (Buur-Hakaba, Baydhabo, Diinsoor iyo Qansax dheere). Weliba, roobab u dhexeeya fudayd iyo dhexdhexaad ayaa ka da'ay tobankii dhexe ee bishii 8aad qaybo ka mid ah Digir Tacbatada Xarardheere, Ceeldheer iyo Ceelbuur ee Bartamaha. Meelaha kale ee gobollada dhexe wax roob ahi kama di'in xilligaa. Xagga Waqooyiga, roobabka Karantu waxay bilaabmeen goor hore oo ah tobankii dhexe ee bisha 7aad, waxayna gobollada Awdal iyo Waqooyi Galbeed heleen roobab fiican oo Karaneed oo da'ayey ilaa tobanaadkii labaad ee bishii 9aad. Gobolka Sanaag sidoo kale wuxuu helay roobab Karaneed oo fiican tobankii dambe ee bishii 8aad.

**Khariidadda 1: Xaaladda Doogganaanta 20ka beri ee hore ee Oktoobar 2010**




Source: SPOT-VEGETATION

Roobabkii Dayrta 2010 waxay ka bilaabmeen bartamihii bishii 9aad meelo badan oo xoolo-dhaqatada Waqooyi Galbeed ah, taas oo muujinaysa in roobabkii Deyrta 2010 ka yara hormareen xilligoodii. meelahaasi. Qiyaasta roobka ee uu qaaday Dayax-gacmeedku, laga sugayna xogta ka imanaysa goobahaasi, in roobab u dhexeeya fudayd Iyo dgexdhexaad oo wada simay Golis/Guban Iyo Oogada Sool ee gobolka Sanaag oo dhami ayaa ka da'ay bishii 9aad iyo qaybo ka tirsan xoolo-dhaqatada Hawdka gobolka Togdheer iyo sidoo kale qayba ka mid ah dhulka xoolo-dhaqatada gobolka Bari (degmooyinka Iskushuban iyo Boosaaso), hase ahaatee, tobankii dhexe ee Oktoobar roobabku waxay ahaayeen kuwo u dhexeey fudeyd iyo dhexdhexaad (10 ilaa 40 mm) oo ka da'ay meelo gaar ah oo ka mid ah dhulka xoolo-dhaqatada.

Xagga gobollada koonfurta iyo bartamaha, degaamada qaar baa waxoogaa roob ahi helay, laakiin guud ahaan waa ay ka qalleyl badnayd. Badhtamaha, meelo ka mid ah dhul-daaqsimeedka muhiimka ah ee Addunka iyo Hawdka gobollada Galgaduud iyo Mudug iyo degaanno dhowr ah oo ku yaalla Gaalkacyo, Galdogob iyo Dhuusamareeb ayaa helay roobab dhexdhexaad ah halka meelaha kale sida degmooyinka Caabudwaaq iyo Cadaado iyo bariga Galgaduud iyo sidoo kale koonfurta Mudug ay roob la'aan ahaayeen dishii 10aad.. Xaga koonfurta, bilawgii roobabka Dayrtu dib bay uga dhaceen dhamaan habnololeedyadoo dhami marka laga reebo Bakool iyo meelo gobolka Baay ka mid ah oo helay roobab 1-10mm ah. Sida lagu soo waramay roobab u dhexeeya fudayd Iyo dhexdhexaad oo teelteel ah ayaa ka da'ay gobolka Jubba bishii 10aad.

***Xaaladda Daaqa***


Roobabka Dayrta ee dib u dhacay awgood iyo dhalanka roobabka ee goosgooska ahi, guud ahaan daaqsinku wuu dhammaan daaquna wuu lumin doonaa cosobnimadiisa ee ku yaalla habnololeedyada kala duwan ee dalka. Xogta Tusaha Kala-duwanaanshaha Caadiga ah ee Daaqa (TKCD) ee tobankii dhexe ee bishii 10aad waxay muujinaysaa in baadka ku yaal dhamaan Bartamaha iyo Waqooyi-bari uu aad uga liitosidii caadiga ahayd. Xaga waqooyiga, baad caadi ah ayaa lagu soo arkay Beer-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed ee gobollada Waqooyi Galbeed iyo Awdal. TKCD sidoo kale wuxuu muujinayaa baad caadi ah inuu ku yaallo meelo ka mid ah gobollada Baay, Bakool, Shabeelle iyo Jubba.

Dib u dhaca iyo dhaqankan goosgooska ahi ee roobabkii Deyrta ayay habnololeedyada xoolo-dhaqatada iyo Beer-xoolo dhaqatada ka muujiyeen walaac gaar waqtiga uu joogo xilligan ooy ahayd in roobabku ay xoogaystaan. Saadaasha cimilada ee muddada dhexe waxay wali sheegaysaa inay jirayaan roobab ka hooseeya xilligii caadiga ahaa taas oo ay sabab u tahay saamaynta ay ku leedahay dhacdada La Nina Deyrtan.

## COLAADDA SOKEEYE

Colaadaha ka socda Soomaaliya, gaar ahaan koonfurta iyo badhtamahu, waxay wiiqayaan sugnaanta cuntada iyo hab nololeedka dalka. Colaadaha dhacay muddadii warbixintan (bilihii 7aad-10aad 2010) waxay keeneen khasaare naf iyo maalba leh, burbur dhismeyaal iyo agabyada kale,khalkhal ku dhaqaalaha iyohawlihii ganacsiga iyo baro-kac bulsho oo dalka gudihiisa iyo dibadiisaba gaadhay. Gobollada Muqdisho, Hiiraan, iyo Galgaduud ayaa weli ah meelaha colaadda ugu ba'nayd muddadii warbixintani ku koobnayd,halka dagaalo cusub oo u dhaxeeya ururada siyaasadeed lagu soo waramay inay ka dheceen Bakool (Rabdhuure iyo Ceelbarde) iyo Gedo( Beledxaawa) bishii 10aad.. Colaada siyaasadeed ee u dhaxaysa maamulka Puntland iyo kooxaha ka soo horjeedaa wali way ka aloosan tahay magaalada Boosaaso iyo degaanka buuralayda Galgala (Bari) ee ku dhaw. Wax colaado dhul daaq-simeed ah oo ka dhacay dhulalka miyiga ah oo la soo sheegay ma jiraan.

**Khariidadda 2: Tirooyinka Barakacayaasha iyo Goobaha ee Soomaaliya**




Isha Xogta: UNHCR Somalia, September 2010

Xaga koonfurta, iska horimaadyo iyo duqaymo aan loo aabo-yeelayn ee ka socota Muqdisho waxay khalkhal galisay hawlihii ganacsiga ee suuqa Bakaaraha, kaas oo ah suuqwaynaha u shaqeeya dalka intiisa badan. Iska horimaadyadu, hadii ay sii socoto, mustaqbalka dheer waxay keeni doontaa inay horjoogsato badeecadihii gaadhi jiray qaybo badan oo dalka ah, gaar ahaan Koonfurta iyo Bartamaha. Colaada ka aloosantay Gedo bartamihii bishii 10aad waxay iyana sidoo kale keentay dhaawac iyo dhimasho, baro-kac iyo hakad ku yimid hawlihii ganacsiga. Sida lagu qoray Warbixinta Samafalka ee todobaadlaha ah ee ay soo saarto OCHA (22-29 bishii 10aad 2010) gaadiidka ganacsigu may galaynin gobolka Gedo colaada ka aloosan awgeed. Xaalad taas la mid ah ayaaayaa laga soo weriyay Bakool (Rabdhuure iyo Ceelbarde).

Dagaalka ka soo cusboonaaday badhtamaha, gaar ahaan qaybaha gobolka Galgaduud (Dhuusomareeb) wuxu sidoo kale keenay dhibaatooyin bani'aadanimo, baro-kac iyo khalkhal ku yimad dhaqdhaqaaqa ganacsiga iyo isku socodka badeecadaha. xiisad ayaa ka oogan qaybo kale oo gobolka ah halkaas oo abaabul dagaalyahanno iyo hub urursi uu ka socdooo keeni kara in colaaddu ku fiddo qaybaha kale ee gobolka saamayn burbur ahna ku yeelato habnololeedyada gobolka. Dhacdooyin ka yar ayaa laga soo sheegay xaga Waqooyiga marka la bar bar dhigo qayba kale ee dalka. Colaada siyaaasadeed ee ka taagnayd Boosaaso sadexdii bilood ee u danbeeysay una dhaxaysay maamulka Puntland iyo ururuada ka soo horjeeda wali waa mid jirta oo saamaynaysa dadka magaalada Boosaaso iyo sidoo kale habnololeedyada xoolo-dhaqatada dhulka sare ee Galgala. Xiisad siyaasadeed ayaa iyaduna ka dhex oogan dawladda Somaliland iyo jabhadda dhawaan samaysantayee saldhigeedu yahay Buuhoodle (gobolka Togdheer).

Sida ku cad xogta IASC PMT qiyaastii 105,000 oo qof ayaa la baro-kiciyay mudadii u dhaxaysay bishii 7aad-10aad 2010 oo 41,000 qof oo ka mid ahi ay baro-kaceen labadii bilood ee u danbeeysay. Baro-kacayaashu waxay intooda badan ka yimaadeen Muqdisho, qaybi waxay ku baracday isla magaalada dhexdeeda meesha inta kale ay ku qaxeen afaafka Afgooye iyo qaybaha kale ee dalka. Natiijadii kasoo baxday qiimeyntii bulshda ee ugu dambeysay ee ay samaysay UNHCR bishii 9aad 2010 waxay muujinaysaa in tirada dadka la baro-kiciyay ay ka korodhay 1.41 malyuun oo ay gaadhay 1.46 malyuun oo intooda badani ay ku suganyihiin afaafka Afgooye iyo qaybaha kale ee dalka (gobollada Mudug iyo Bari). Dagaalkii dhawaan ka dhacay Beledxaawa, gobolka Gedo (bilawday 17-kii bishii 10aad 2010) ee u dhaxeeyay xoogaga taageersan TFG iyo kooxaha ka soo horjeeda ayaa tiro badan oo dad ah baro-kiciyay oo u badan dumar iyo carruur. Sida ku cad warbixinta UNHCR ee soo baxday 29kii bishii 10aad, qiyaastii 7,100 oo ka kooban dad da' ah, dumar iyo carruur ayaa ka baxay guryahoodii oo ku sugan hal meel oo xuduuda ah oo wixii lagu noolaan lahaa ay ku yaryihiin. Sidoo kale, dagaalkii dhawaan ka dhacay qaybo ka mid ah Bakool (Ceelbarde iyo Rabdhuure) ayaa isaguna khalkhaliyay hab nololeedkii xoolo-dhaqata iyo beer-xoolo dhaqatada baro-kacna sababay.

Marka culayska ay maraakiibta caalamka ay ku hayaan lagu daro, budhcad-badeedu waxay wali hortaagan yihiin hawlihii kalluumaysiga iyo ganacsiga gaar ahaan Waqooyiga iyo Badhtamaha Soomaaliya. Inkastoo hawlaha kalluumaysigu ay dib u bilaabmeen bishii 10aad ka dib afar bilood oo kala dhac ah xilliga dabeel Xagaaga awigii (bilihii 6aad - 9aad) budhcad-badeeda xeebaha soomaaliya ayaa wali ah sababta yaraysay ganacsiga waxsoosaarka kalluunka saamaysayna dhaqaalahii kalluumaysiga kasoo galayay degaanka.

Hawlaha aadanenimo waa ay soo koobmeen inta badan Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya. Sida laga soo xigtay warbixinta Gaarsiinta hawlaha aadanenimo ee OCHA (Bishii 9aad 2010), tirada shaqaalaha gargaarka ee caalamiga ah ee joogta Koonfurta iyo Bartamuhu aad bay uga yartahay kuwa jooga Waqooyiga. dhamaadkii bishii 9aad, tirada guud ee shaqaalaha gargaarka ee caalamiga ahi ee ku sugan dalku waxay ahayd qiyaastii 180, taas oo tilmaamaysa inay tiradu hoos uga soo yara dhacday 200 intii ay ahayd bishii 7aad 2010.

## BEERAHA


Muddadii u dhexeysay bilihii 7aad iyo horraantii bishii 9aad 2010, roobab dhexdhexaad ah iyo kuwo ka yara hooseeya ayaa ka da'ay xeebaha iyo meelaha beer-xoolo dhaqatadadariska la ah, iyo waliba aagga diil-webi ee gobollada Shabeelle iyo Jubba. Roobabku waxay kaloo ku fideen habnololeedyada beer-xoolo dhaqatada gobolka Baay. Roobabka Xagaagu waxay hagaajiyeen xaaladda midhihii gadaal dambe la beeray (bishii 7aad) firidii Gu'ga iyo dalagga iibka ee taagnaa iyo weliba midhahii kal dambeedka laga beeray gobollada Juba. Roobku wuxuu kaloo sababyin beer abuurkii Deyrta uu billaabmo goor hore bishii 9aad, gaar ahaan habnololeedyada diil-webi Shabeelle. Isla mudaa waxay beer-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed heshay roobab fiican oo Karaneed.



*Galley Hore Loo Abuurey. Jowhar, Shabeellaha Dhexe, FSNAU, Oktoobar 2010*


Dhul diyaarin iyo Jiilaal abuurkii Dayrta ayaa lagu soo arkayay dhamaan gobollada wax laga beero ee koonfurta tan iyo bilawgii bishii 9aad. Aagga diil-webi ee Shabeelle, Jubba, Gedo iyo Hiiraan, beeralaydu waxay bil-labeen inay beeraan ooy waraabiyaan gallay, bariis iyo dalagga iibka.. Waxa intaa dheer, dalagga iibka ooy ka mid yihiin tamaandhada/yaanyo, basasha, berberoni, bocorka iyo cambaha iyo liinta iwm ayaa si aad ah looga goostay dhulka diil-webi iyo weliba dhulalka roob-waraabka (inta badan khudaarta) ee helay roobabkii Xagaaga. 22-27[kii] Sebteembar 2010, FSNAU waxay ka fulisay qiimeynta dalagga ee kal dambeedka ee aagga diil-webi ee gobollada Jubba, halkaasoo beerashadii ay ka billaabatay bishii 7aad 2010 ka dib markii fatahaadihii Gu'gu ay gooyeen dalagii bishii 5aad 2010. Sida kasoo baxday natiijada qiimayantaasi, dhul bedkiisu dhanyahay 24,700 oo hectar ayay ka soo go'een galley, digir iyo sisin kal dambeedkan diil-webi Juba bishii 9aad 2010. Gallayda soo go'day kal-dambeedkan waxa lagu qiyaasay 7,300 Mt kaas oo ka yar 12% saadaashii FSNAU ee ay samaysay xiligii Gu'ga ka dambeysay. Hoos u dhacaa yari marka loo barbar dhigo sadaalihii hore waxa sababay biyihii fatahaadda bixitaankooda oo gaabis noqday ooy ugu wacnayd dhulka oo qoyanaa ka dib markii ay heleen robab dabayaaqadii bishii 7aad - horraantii bishii 9aad iyo wax yeelladii dhuunqabadka ee lagasoo weriyay ee degmada Jamaamme (Jubbada Hoose). Hase ahaatee, meelaha qaarkood roobabkii bishii 7aad - 9aad ayaa waxtar bay u lahaayeen wax soo saarkii kaldambeedka.. Qiyaastii 84% gallaydii soo go'day waxay ka soo go'day sadex degmo oo ka tirsan Jubbada Dhexe(6,100MT) oo ay ka midyihiin Saakow (2,500MT), Jilib (2,100MT) iyo Bu'aale (1,500MT). 16% ka kale ee gallaydii kal dambeedka waxay ka soo go'day Jubbada Hoose (1,200MT Jamaamme). Sisinta soo go'day waxa lagu qiyaasay 4,520MT, oo 55% ay ka soo go'een Jubbada Dhexe (Jilib-26%; Saakow-16%; Bu'aale-13%) iyo 45% oo ka soo go'ay Jubbada Hoose (Jammaame-40%; Kismaayo-3%; Afmadow-2%). dalaga soo go'ay kal-de=ambeedkii ee digirta ee lagu dhex beeray gallayda markii kal-dambeedka la beerayay ayaa lagu qiyaasay 800MT, oo inta badani ka soo go'day Jubbada Dhexe (69%) intii soo go'day. Dalaga Sisinta iyo Digirta ee ka soo go'ay labada gobolba waxay aad ugu dhawyihiin saadaashii Gu'gii 2010dabadii la sameeyay.

**Jaantuska 1: Qiimaha Galleyda ee Webilleyda Shabeelle iyo Jubba**




Intii lagu jiray falanqayntii Gu'gii 2010 ka dabadii, FSNAU sidoo kale waxay saadaalisay 48,000MT oo hadhuudh iyo gallay ah oo xilliga Gu'ga/Karanta ka soo gu'i doona meelaha beer-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed. FAO oo kaashanaysa FSNAU, WFP iyo Wasaarada Beeraha ee Somaliland ayaa qiimeyn ku sameeyay beer-xoolo dhaqatada Waqooyi Galbeed ee gobollada Awdal, W.Galbeed iyo Togdheer intii u dhaxaysay 10-23kii bishii 10aad 2010. Muddadii lagu jiray qiimeyntaa waxa la adeegsaday Qalabka Sawir ku Qiimaynta si loo ogaado dallaga ka soo go'i kara. Qiimeynta waxa lagu qiyaasay in dalaga soo go'aya xilliga Gu'/Karanta uu la'eg yahay 79,000MT, kaas oo ah dalagii ugu badnaa ee soo go'a tobankii sanadood ee u danbeeyay. Dalagan badan ee soo go'ay waxa lagu sababeeyay roobabka Gu'ga iyo Karanta oo si fiican uga da'ay oo wada gaadhay dhul-beereed oo dhami iyo sidoo kordhinta dhulkii la beertay oo la badiyay. Gabiley, oo ah degmada ugu wax soo saarka badan firileyda ee gobolka ayay ka soo go'een dalaga 45% wadarta guud ee firilaydii xilliga Gu'/Karanta soo go'day, halka 55% kale ay ka soo go'een gobollada Awdal (29%) Hargaysa (20%) iyo Togdheer (6%).

**Jaantuska 2: Qiimaha Massagada/Hadhuudhka**




Dalaga wanaagsan ee soo go'ay sannadkan awgeed (Dayrtii 2009/2010, kal-dambeedkii Deyrta, Gu'gii 2010 iyo kal-dambeedkii Gu'ga) firilayda waxa aad looga heli karaa suuqyada degaanka koonfurta Soomaaliya. Waxa intaa dheer, firida ganacsiga ee dibadda laga keeno ayaa kordhay tiradooda labadii bilood u dambeysay ka dib markii uu dhammaaday bad-xirankii. Hase ahaatee, isbedbeddelka sicirka ee firilayda dalka ka baxdaa ayay ka muuqatay baaxaa-deg intii u dhaxaysay bilihii 7aad-9aad 2010. Tusaale ahaan, celceliska sicirka gallayda hoos buu u dhacay ilaa bishii 7aad 2010 gobolka Jubba (38%) iyo Shabeelle (44%). Marka la bar bar dhigo sanadkii hore (Bishii 9aad 2009) sicirka gallaydu sidoo kale wuu hooseeyay gobollada Jubba (15%) halka hoos u dhacu aanu sidaa u sii buurrayn (1%) gobollada Shabeelle (Jaantuska 1). Dhanka kale, celceliska sicrka hadhuudhku/masagada wuu kordhay laga bilaabo bishii 6aad ilaa bishii 9aad 2010 gobolada masagada tabcadabadankooda (7-19%) marka laga reebo gobolka Baay oo uu sicirku hoos u dhacay 20% (Jaantuska 2). Sicir korodhka ugu sarreeya oo ah 43% ayaa lagasoo minguuriyay degmada Baardheer(Gedo) oo habnololeedyada dariska la ah uu aad dalabkooda u badnaa iyo ceshoshada kaydka reeraha si ay cunno uga dhigtaan. Marka la bar bar dhigo sanadkii hore (Bishii 9aad 2009) sicirka hadhuudhku/masagada aad buu uga kacay gobollada hadhuudhka tabcada badidooda oo uu ka mid yahay gobolka Baay(26%), Bakool (55%) iyo Hiiraan (60%) sababtuna waxa weeye dalabka hadhuudhka ee gobollada dhexe iyo qaybaha kale ee dalka oo batay iyo hoos u dhaca raashinka gargaarka ah, colaada sokeeye ee sii xumaatay iyo dalaga ba'ay ee (Hiiraan) (Jaantuska 2). Hase ahaatee, sicirka hadhuudhka ee gobolka Gedo wuxu 9% ka hooseeyaa marka la bar bar dhigo bishii 9aad 2009 sababtuna waxa weeye dalagga soo go'ay oo aad u kordhay Gu'gii 2010 marka la bar bardhigo Gu'gii 2009 (334% korodh ah). Xaga Koonfurta, meelaha qiimaha hadhuudhku ugu sarreeyay bishii 9aad 2010 waxa weeye gobolka Gedo (11,000SoSh/kg) iyo Bakool (11,000SoSh/kg), halka meesha ugu qiimaha hoosaysaana ay noqotay degmada Wanlawayn ee Shabeellaha Hoose (3,300SoSh/kg)

iyo gobolka Baay 5,000SoSh/kg). Xaga Waqooyi Galbeed, sicirka hadhuudhka cad ee bishii 9aad ayuu 7% iyo 18% ka hooseeyay Bishii 6aad 2010 iyo Bishii 9aad 2009, waa siday u kala horeeyaane, sababtuna waxa weeye tiro badnida haruurka yaal suuqa ee ka yimid waxsoosaarkii Gu'/Karantan.

Hoos u dhaca sicirka firilayda ee gobollada Shabeelle, juba, iyo Baay ee bilihii 7aad-9aad 2010 waxay macanaynaysaa inuu soo hagaagay awoodda wax-iibsiga ee qoysaska ku dhaqan gobolladaasi. Isweydaarsiga ganacsiga (IG) ee isku doorsiga mushqaayada muruq-maalka iyo sicirka firilaydu waxay korodhay 143% gobollada Shabeelle, 67% Jubba iyo 11% Baay, taas oo muujinaysa in awoodda wax-iibsiga ee dadka gobolladaasi uu xoogaystay. Isweydaarsiga ganacsiga ayaa sidoo kale korodhay 21% gobolka Hiiraan (17kg oo hadhuudh ah/shaqo maalmeedkii, bishii7aad 2010) oo ay sabab u tahay mushqaayaadda shaqo maalmeedka oo kordhay (41%) taas oo sabab looga dhigayo hawlaha ganacsiga ee aadka u socda oo ay ka midyihiin ganacsiga xoolaha ee xilliga Xajka. Isweydaarsiga ganacsiyada ayaan iska beddelin heerkoodii bishii 6aad 2010 ee gobolka Bakool (5-6kg oo hadhuudh ah/shaqo maalmeedkii) iyo Gedo (9-26kg oo hadhuudh ah/shaqo maalmeedkii). Bishii 9aad 2010, heerka ugu sarreeya ee Isweydaarsiga Ganacsiga oo ah 26kg oo hadhuudh mushaqaayad shaqo maalmeedkiiba ayaa laga soo minguuriyay degmada Beledxaawo(Gedo), taas oo ah natiijo ka dhalatay hoos u dhaca sicirka hadhuudhka oo gaadhay (21%) iyo mushqaayada muruq-maalka oo aad u korodhay hawlaha ganacsiga xuduudka Kenya ka imanaya awgood. Isla bishaa, heerka ugu sarreeya ee Isweydaarsiga Ganacsiga ee mushqaayad maalmeedka muruq-maalka iyo gallayda cad ayaa laga soo minguuriyay degmooyinka gallayda ugu soo saarka badan ee Qoryooley (24kg/shaqo maalmeedkii) ee gobolka Shabeellaha Hoosee iyo Jamaamme (28kg/shaqo maalmeedkii) ee gobolka Jubbada Hoose. Beer-xoolo dhaqatada Waqooyi-galbeed, isweydaarsiga ganacsiga ee bishii 9aad 2010 (16kg oo hadhuudhka cad ah/shaqo maalmeedkii) taasoo ka sarreysa 23% bishii 6aad 2010 sababtuna tahay hoos u dhaca sicirka hadhuudhka ooy ugu wacnayd wax soosaarkii fiicnaa ee Gu'/Karanta iyo sidoo kale qiimaha mushqaayada maalinlaha ah ee muruq-maalka oo kordhay. Guud ahaan, awoodda wax-iibsiga ee dadka ku dhaqan gobolada firilaydu ka baxdo ee Soomaaliya wuu xoogaystay marka la bar bar dhigo sanadkii hore (bishii 9aad 2009) sida ka muuqata heerka kordhka ee Isweydaarsiga Ganacsiga gobolada Shabeelle, Gedo iyo Waqooyi Galbeed. Hase ahaatee, itaal darro ayaa ka muuqata awoodda wax-iibsigu ee gobolada Bay, Hiiraan iyo Bakool oo heerka isweydaarsiga ganacsigu uu hoos uga dhacay inta u dhaxaysa 15-37%, halka isweydaarsiga ganacsiga aanu isbaddelin gobollada Jubooyinka.

## XOOLAHA


### Xaaladaha daaqa iyo biyaha

Xaaladaha daaqa iyo biyuhu way fiicanyihiin inta badan meelaha dhul-daaqsimeedka ah iyo xoolo-dhaqatada iyo beero-xoolodhaqata ee Waqooyiga (dhul-daaqsimeedka Golis, dhul-daaqsimeedka Karkaar-Dharoor, dooxada Gabi, qaybaha galbeed ee Soolka kore ee Sanaag, qaybaha Hawdka Togdheer, Nugaal iyo Mudug iyo dhulka xoolo-dhaqata iyo beeralayda dhafan ah ee Waqooyi Galbeed) sababtuna waxa weeye roobabkii fiicnaa ee Gu'aga 2010 oo ay ka danbeeyeen roobabkii Karanta dheeraatay iyo Dayrtii soo hore u soo martay bishii Sebteembar. Hase ahaatee, roobabkii bilawgii da'ay waxay keeneen in dadku ka hayaamaan meelihii aan roobka lahayn ee Waqooyi Bari, bariga Nugaal iyo Addun iyo xeebta Deex ee gobollada Mudug ilaa Hawdka, Golis iyo dooxada Dharoor/Karkaar oo ay u hayaameen meelihii daaqa iyo biyuhuba ku badnaayeen ee Waqooyiga, taas oo keeni karta in biyaha iyo daaquba ku yaraadaan meelahaas.Xaalada biyaha iyo daaqa ee dhul-daaqsimeedka xeebka Deex iyo degaanada ee ku dhaw ee gobolada Shabeelle iyo Jubba ayaa lagu soo waramayaa Inay ka soo raynayso roobabka wanaagsan ee Xagaaga awgood. Sidaa awgeed, qiimaha biyaha ee gobollada dhexe way ka badanyihiin heerkii caadiga ahaa sanadkan, halka dhul-daaqsimeedka fiican ee Jubba ay qiimaha waraabinta xooluhu ay labalaabmeen bisha Sebteembar 2010 mraka loo eego bisha juune (4,000SoSh neefkii geela, 2,000SoSh neefkii lo' ahiyo 1,000SoSh neefkii adhi ah). cawska laga soo daabulo dhulka daafaha wabiga Jubba ayaa lagu soo waramay in la keeno suuqyada degmada Afmadow, waana markii ugu horraysay ee la arko ilaa Xagaagii 2008, sababtuna waxa weeye iyadoo dhulkii ay xaalufiyeen xoolo badan oo ku soo hayaamay aggaas oo baad iyo biyoba u soo doontay dhulka biyo qabatinka ah ee Jubba. Lo'ada iyo idaha/riyaha ayaa sidoo kale ka hayaamay Afmadow oo tagay dhulka daafaha wabiga iyo xeebta.



*Geel iyo Riyo Miisaankooda Wanaagsan Yahay oo La Horayo. Tabta. Afmadow, Jubbada Hoose, FSNAU, Oktoobar 2010*

**Jaantuska 3: Qiimaha Riyaha Daabaxa (SoSh/SlSh)**




### Xaalada jidhka xoolaha, tarankooda iyo wax soo saarkooda


Guud ahaan, xaaladda jidhka xooluhu way ka soo raynaysaa qaybaha Waqooyiga, xeebta Deex iyo dhulka ku dhaw ee Koonfurta ee roobabku ka da'een mudadii Luulyo-Sebteembar 2010. Hase ahaatee, xaalad ka sii daraysa ayaa laga soo sheegay xoolaha ku dhaqan meelaha roobku ku yaraa ee Addun, xeebta Deex iyo Cowpea Belt ee badhtamaha. celceliska xaalada jidhka waxay ahayd dhex dhexaad ilaa Gu'gii 2010 ee xeebta Deex iyo Cowpea Belt ee degmada Ceeldheer ee badhtamaha iyo dhinaca koonfurta xilligii ay xooluhu hore ugu hayaameen daafaha wabiga ee gobollada Shabeelle iyo Jubba roobii oo aan di'in awgood xiligii Xagaaga . Lo'da, idaha, iyo riyaha tarankoodu si aan caadi ahayn ayuu kor ugu kacay guud ahaan wadankoo dhan sababtuna waxa weeye rimaygooda oo aad u fiicnaa xiligii jiilaalka iyo Guga 2010 (horaantii Maarso) idaha iyo riyuhu inay aad u dhaleen ayaa la soo sheegay dabayaaqadii Sebteembar 2010, sidoo kalena waxa la filayaa inay sii kordhaan labada bilood ee soo socda. Lo'du in aanay aad u dhalin ayaa la sheegay xaga koonfurta dabayaaqadii Xagaaga laakiin waxa la filayaa inay korodho kolka Dayrtu soo gasho.

### Ganacsiga Xoolaha, Qiimaha iyo shuruudaha Ganacsiga

Bilaha Luulyo-Sebteembar 2010 xaddiga iibka xoolaha la dhoofiyo wuu kordhay sida lagu arkay sayladaha waawayn dalabka Xajka awgii, xayiraadii ay dawladaha Gacanku ka qaadeen xoolaha la dhoofiyo bishii Oktoobar 2009 waxay kordhisay fursada ay dadka hantida lihi ku gadi karaan xoolaha dammaanka ah. Tirada guud ee xoolaha la dhoofiyay intii u dhaxaysay Luulyo iyo Sebteembar waxay gaadhay 1,002,928 neef oo 64% (644,959 neef) ka dhoofeen dekeda Berbera iyo 36%(357,696 neef) ka dhoofeen dekeda Boosaaso. Heerka dhoofka xooluhu wuxu 37% ka badanyahay isla mudadaa sanadkii hore intii la dhoofiyay (734,642 neef). Tirada dhoofka xooluhu inay aad u sii korodho ayaa la filayaa bisha Noofambar. Dhamaan shantii wershadood

ee hilibka ee Gaalkacyo, Beledwayne, Burco iyo Muqdisho may shaqaynin ilaa Oktoobar 2009. Hase ahaatee, wershada Burco aya shaqadii dib u bilawday Luulyo 2010 waxayna dhoofisay 14,206 neef hilibkood bilihii Luulyo-Sebteembar 2010.

**Jaantuska 4: Wax-isku-beddelashada - Firilley lagu beddesho Riyo, Waqooyi**




Qiimaha riyaha daabaxa ahi wuu kordhay Luulyo-Sebteembar 2010 ee gobolada laga tacbado xadhuudhka (16%) Shabeelle (8%) iyo badhtamaha (1%) halka qiimuhu hoos u dhacay Waqooyi Bari (9%), Jubba (1%) iyo Waqooyi Galbeed (19%) taas oo ay sabab u tahay dadka xoolo dhaqatada ah oo aad u gadaya si ay iskaga bixiyaan amaahihii ay qaateen xiliyadii Gu'ga iyo Xagaaga ee 2010. Sidoo kale qiimuhu aad buu u kordhay dooxada Shabeelle (19%), gobollada hadhuudhka laga tacbo(39%) iyo Jubba (50%) ilaa sanadkii hore (Sebteembar 2009) waxana sabab u ah xaalada jidhka ee xoolaha oo aad uga soo fiicnaadaay iyo dalabka Xajka oo kordhay. Dhanka kale, qiimaha riyuhu hoos buu u dhacay gobolada Waqooyi Bari (7%) isla mudadaa marka loo bar bar dhigo halka qiimaha aanay waxba iska badalin badhtamaha (shaxanka 3). Qiimaha Lo'ada dhaqaalka lagu kala iibsadaa wuu kordhay gobolada hadhuudhka laga tacbo (55%) iyo Jubba (45%) iyo shabeelle hoo heer dhexeed ah (13%) ilaa Sebteembar 2009. Kordhka aadka ah ee gobolada hadhuudhka laga tacbo iyo Jubba waxa lagu sababaynayaa dalabka lo'da iyo qiimaha oo kordhay dhinaca saylada Gaarisa.


Celceliska heerka iskubedelashada ee firilayda iyo riyuhu wuu kordhay Jubba (57%), Shabeelle (92%) iyo gobolada hadhuudhka laga tacbo (11%) bilihii Luulyo-Sebteembar 2010. Korodhka heerka wax-iskubedalashdaasi waxa lagu sababaynayaa qiimaha firilayda oo hoos ugu dhacay gobollada hadhuudhku laga, Jubba iyo Shabeelle iyo qiimaha xoolaha oo yara kordhay. Dhanka kale, heerka Iskubedelashada firilayda iyo riyaha hoos buu u dhacay badhtamaha (8%), Waqooyi Bari (19%) iyo Waqooyi Galbeed (20%) (shaxanka 4), sababta oo ah qiimaha bariiska oo aagagaas kordhay iyo qiimaha xoolaha oo meelaha qaar hoos u dhacay. Sebteembar 2010, heerka ugu sarreeya ee isku doorsiga firilayda iyo riyaha degaanka waxa laga soo sheegay Shabeelle (263kg gallay ah/neef) iyo Jubba 9138kg gallay ah/neef). dhinaca waqooyiga iyo badhtamaha oo bariisku yahay raashinka ay badi dadku quutaan, heerka ugu sarreeya ee isweydaarsiga bariiska iyo riyaha waxa laga soo sheegay gobolka Bari (71kg bariis ah/neef) halka heerka ugu hooseeyana laga soo sheegay gobollada abaartu saamaysay ee Sanaag (24kg bariis ah/neef) iyo badhtamaha (33-34kg/neef)

## SUUQYADA IYO GANACSIGA

### Qiimaha Sarifka


Kala badhkii horee sanadka 2010 oo uu xasiloonaa ka dib, SoSh waxa qiimihiisu xoogaystay 4% ilaa bishii 6aad ee sanadkan oo u ka soo dagay 32,538 SoSh/Dollar (USD), bishii 9aad waxa celeliska sarifku ahaa 31,319 halkii Doollar. Lacagihii lasoo Xawilayey bishii Ramadaan iyo Ciidal Fidriga awgeed iyo lacagta adag ee ka soo xaroonaysay xoolaha la dhoofinayo xilligan Xajka ee kordhay ayaa sabab u ahaa inuu xoogaysto shilin soomaaligu intii lagu jiiray bilihii 7aad-9aad. waxa Intaa dheer, suuqyada waawayn badankooda qiimaha Shilin Soomaaliga wuu ka yara kacay (3-5%) bishii 9aad marka la bar bar dhigo ilsa bishaa ee sanadkii hore marka laga reebo Gaalkacyo oo uu 2% ka hooseeyay. Hase ahaatee, Shilin Soomaaliga qiimihiisu waxoogaa buu aad hooos ugu dhacay marka la bar bar dhigo heerka sicir bararka ee haatan taagan ka hor (Bishii 3aad 2007) (Jaantuska 5).

**Jaantuska 6: Waqooyi-Galbeed - Qiimaha Badeecadaha La Soo Dejiyoa oo Loo Eegey Qiimaha Sarrifka**




Sidoo kale Shilinka Somaliland (SlSh) ayaa isaguna qiimahiisu xoogaystay intii u dhaxaysay bilihii 7aad - 9aad oo qiimihiisu sare u kacay 12%. Bishii 9aad 2010 SlSh waxa sarifkiisu uu suuqa Hargeysa ka ahaa celcelis ahaan 5,900 SlSh/USD. Tani waxay muujinaysaa in qiimaha Shilinka Somaliland 9% sare u kacay marka la barbar dhigo isla mudadaa oo sanadkii hore ah (6,500 SlSh/USD bishii 9aad 2009) gaar ahaan qiimaha Shilinka Somaliland wuxuu xoogaystay ilaa Bishii 7aad ee sanadkan, taas oo lagu sababayn karo xasilinta siyaasada degaanka ka dib doorashooyinkii nabada ahaa ee bishii Juunyo.

**Jaantuska 5: Qiimaha Sarrifka ee Billaha – SoSh iyo SlSh iyo USD**





### Qiimaha Ganacsiga Badeecadaha la soo Dejiyo

Qiimaha badeecadaha la soo dejiyo badankoodu (saliida, sonkorta, bariiska, burka) sare ayuu uga kacay halkii uu taagnaa bishii 6aad 2010 ee suuqyada Shilin Soomaaliga lagaga adeegto. Gaar ahaan qiimuhu wuxu aad u kordhay koonfurta (1-7%), Waqooyi Bari (2-16%) iyo badhtamaha (11%). korodhka qiimaha badeecadaha la soo dajiyo sida bariiska, sonkorta, saliida iyo naaftada waxa la dareemay mudadii u dhaxaysay bilahii 7aad-8aad 2010, ka dib markii bad xidhanku kala jaray keenistii badeecadahaa dalabkii ramadaantuna kor u kacay bishii A8aad. Hase ahaatee, qiimuhu bishii 9aad wuu iska xasilloonaa suuqyada Badhtamaha qaarkoodna hoos buu u dhacay ka dib markii soo dajinta badeecadahaasi dib u bilaabmeen bad xidhankii ka dib.

Xaga Somaliland Shilinka lagaga adeegto, dhinaca kale, badeecadaha la soo dejiyo qiimahoodu sare buu u kacayay ilaa bishii 7aad ee sanadkan. Tusaale ahaan, sicirka bariiska iyo sonkortu waxay suuqyada Hargaysa ka kordheen 38% iyo 16% waa siday u kala horeeyaane intii u dhaxaysay bilihii 6aad - 9aad 2010. korodhka sicirka bariiska waxa aad u sababay firilayda oo aad ugu qulqushay gobolka jaarka la ah ee Etoobia kaas oo xiliyadii hore ay ka taagnaayeen xiisado la xidhiidha badeecadaha ka gudbaya xuduudka Soomaaliya iyo Itoobiya (jaantuska 6)

Qiimaha badeecadaha la soo dejiyo badankoodu bishii 9aad 2010 wuu ka sarreeyay Isla mudadaa oo sanadkii hore ah, gaar ahaan Badhtamaha (6-19%) iyo Waqooyi Bari (6-29%). korodhka qiimaha bariiska iyo naaftada waxa inta badan lagu sababaynayaa hoos u dhaca badeecooyinka ka soo dega dekada Boosaaso marka la bar bar dhigo sanadkii kore (Bishii 9aad 2009) taas oo ah dekad muhiim ah oo ay wax u soo maraan labadaa gobolba. Hase ahaatee, xaddiga firilayda laga soo dejiyay dekadan bishii 9aad 2010 wuxu ku dhawyahay celceliska heerkii wax soo dejinta ee sadexdii sanadood ee hore (2007-2009).

**Jaantuska 7: Tusaha Sicirka Wax-iibsiga (CPI)**




*Roobabka Dayrta* (Bilaha 10-12), oo wadooyinka xidhi kara todobaadyada soo socda, tirada badeecadaha lasoo dajiyo oo kordha, dhaqanka sicirka suuqyada dunida oo lala socdo korodhka sicirka bariiska ayaa ka mid ah waxyaabaha muhiimla ah ee xukumi doona sicirka badeecadda lasoo dajiyo dhowrka bilood ee inagu soo fool leh.

**Tusaha Sicirka Wax-iibsiga**

Tusaha Sicirka Wax-iibsiga (CPI) wuxu muujinayaa xasiloonida qiimaha wax iibsiga ee ugu hooseeya mudadii Bilihii 7aad-9aad ee meelaha Shilin Soomaaliga lagaga adeegto, oo waxoogaa korodh ahi ku yimid (1-3%) suuqyada waawayn ee Waqooyiga iyo Koonfurta, halka uu waxoogaa yara kacay (8%) Badhtamaha. Meelaha lagaga adeegto Shilinka Somaliland CPI waxa uu muujinayaa korodh dhex dhexaad ah oo 5% ah. korodhka CPI waxa inta badan uu ku yimid sonkorta, burka iyo hadhuudhka (eeg qaybta beeraha) kuwaasoo qaataa 34-48% Kharashka ugu Yar ee Qoys ku filan ee jiidaha kala duwan.


Marka la barbar dhigo Bishii 9aadee sanadkii hore, tusaha sicirka wax-iibsiga xoogaa ayuu kordhay, hase ahaatee wuu xasiloonyahay meelaha Shilinka Somaliland iyo Shilin soomaaliga lagaga adeegto. Hase ahaatee, tusaha wax-iibsiga aad buu u sarreeyaa marka la bar bar dhigo intii u salka ahayd bishii 3aad sanadkii 2007 ee meelaha Shilin Soomaaliga lagaga adeegto oo ay ka mid yihiin Koonfurta (97%), Badhtamaha (127%) iyo Waqooyi-bari (106%). Tusaha wax-iibsiga waxa kaloo uu kordhay 13% isla mudadaa meelaha Shilinka Somaliland lagaga addegto ee Waqooyi-galbeed (Jaantuska 7).

**XAALADDA GUUD EE NAFAQO**


**Sahanka Nafaqada ee Gobolka Sanaag**

Hay'adda caalamiga ee arrimaha caafimaadka ee Corps (IMC) oo kaashanaysa FSNAU/UNICEF ayaa sahan nafaqo ka samaysay gobolka Sanaag intii u dhaxaysay 1-12 Oktoobar 2010 iyada oo adeegsanaysa habka caalamiga ah. Daraasaddan waxa loola jeeday in lagu xaqiijiyo xogta xaaladda nafaqo taas oo daba socota falaqaynta xaaladda sugnaanta cuntada iyo nafaqada ee xilligii Gu'aga bishii Agoosto taas oo muujisay xaalad feejignaan ama digniin ah ah, iyo dhibaato xagga cunta helidda oo ka jira qaybo gobolka Sanaag ah (khariidada 3 iyo 4). Xogtani waxay kale oo sal u noqonaysayaa wax ka qabashada xaaladda nafaqo ee uqorshaysan IMC.

**Khariidadda 3: Xaaladda Nafaqada, Gobolka Sanaag Luulyo 2010**




**Khariidadda 4: Xaaladda Sugnaanta Cuntada ee Gobolka Sanaag, Luulyo-Diseembar 2010**





Natiijooyinka soo baxay iyadoo la adeegsanayo miqyaaska korordhka ee WHO iyo saadaasha qiyaasta CDC waxay muujiyeen in heerka nafaqo darrada caalamiga ahi (GAM) yahay **>8.5%** (Pr= 0.90) iyo heerka nafaqo darrada ba'ani(SAM) tahay **>0.6%** (Pr= 0.90), oo midkiiba leedahay inay dhacdo (0.3%) oo oedema ah. Natiijooyinkanai waxay muujinayaan in xaaladu tahay heerka **Digniinta ama feejignaanta ah** gobolka Sanaag laga soo bilaabo falanqeyntii xilligii Gu'ga 2010. Heerka dhimashadu waa **0.35** (0.14-0.86) dhimasho/10,000 qof/maalintii lamana soo sheegin wax dhimasho ah ee carruurta ka yar da'da shan sano waxayna taasi muujinaysaa in xaaladdu tahay mid **la Aqabali karo** marka la xiganayo hab qiyaaseedka kala qeybineed ee WHO. Heerka




*Cabbirka MUAC, FSNAU, Maajo 2010*

**Jaantuska 8: Nafaqo-xumada M/L MCH-yada Webilleyda Jubba**




waxyaabaha u nugleeya xaaladda nafo darrada carruurta ee gobolka ka jira ayaa ka hooseeya heerkii caadiga ahaa ee gobolka iyadoo 27% carruurta qiimeynta lagu sameeyay la ogaaday inay u soo dhaceen xanuuno labadii todobaad ee ka horeeyay xilliggii sahanka la waday. Waxa kaloo iyana walaac keenaysa xaaladda helida biyo nadiif ah, fayodhawrka iyo goobaha caafimaadka oo ku kooban in ka yar 50% dadka lagu sameeyay sahanka . Helitaanka caanaha la cabbo oo liita ama la iibiyo ayaa uga sii daraya xaaladda nafaqo ee hab nololeedyad xoolo dhaqatada wakhtigan oo kale sanadkan gudihiis taas oo ay sababtay xaaladda xoolaha oo xun iyo xoolaha oo hayaamay.

**Jadwalka Sahammada Nafaqo ee FSNAU/UNICEF**

FSNAU oo kaashanaysa UNICEF ayaa waxay jadwal u samaysay inay ka fuliso 10 sahan nafaqo gobolada dhexe (hab nololeedyada Hawdka iyo Addun, gobolka Galgadud, iyo dadka kusoo baro-kacay magaalooyinka Boosaaso, Garoowe iyo Gaalkacyo) iyo qaybo ka tirsan Somaliland (hab nololeedka Dooxada Nugaal, iyo dadka ku soo baro-kacay magaalooyinka Hargaysa, Burco iyo Berbera) bisha Noofembar 2010.

*Faahfaahinta natiijooyinka ka soo baxa sahanka nafaqo ee Sanaag iyo jadwalka sahammadda nafaqo ee muddada Noofambar-Diisambar, waxad ka eegtaa boggan http://www.fsnau.org/products/nutrition-update.*

**Qiimeynta xoolo dhaqatada saboolka ah ee Waqooyi Bari**

Bishii Oktoobar 2010, FSNAU waxay samaysay daraasad deg dega oo hubantida cuntada ah oo ay ku sahamisay xoolo-dhaqatada saboolka ee xooluhu kaga baxeen abaarihii is xigay ee sanadihii dhawrka ahaa. gobolada waqooyi bari, qiimeynta deg dega ah ee xaalada nafaqo waxay ku salaysnayd oo laga sameeyay aagga kore ee Mudug (Gaalkacyo, Bacaadwayne, iyo Galdogobo) iyo Nugaal (Burtinle). degmo kasta 9,28,4 iyo sagaal qoys ayaa qiimeynta lagu sahimayay taas oo ka dhigaysa gobol kasta In lagu sahamiyay 50 qoys. tirada guud ee qoysasku waxay u dhaxaysay 3-15 oo cel celis ahaan qoyskii noqonayo 7 qof.

Natiijada qiimeyntu waxay muujinaysaa in saamiga carruurtu hooseeyo (0.9%) ilmihiiba MUAC <12.5cm ama oedema. inta badan (100%) qoysaska qiimeynta lagu sameeyay waxay quutaan cunto kala duwan oo ka kooban afar nooc ama ka badan cunto ka samaysay 24 saacadoodba. dhamaan qoysaska la qiimeeyay cel celis ahaan waxay quutaan 6.5 nooc oo cunto ah. quudashada firilayda, sonkorta, saliida, iyo caanaha ayaa aad u saraysa, in ka badan 93% qoysayska la qiimeeyay; halka khudrada, hilibka kalluunka ay quutaan in ka yar 40% qoysaska la qiimeeyay. dhamaan qoysaska la qiimeeyay waxa lagu soo waramay inay cunto maalmeedkooda soo iibsadaan. carruurta ka yar shan jirka badankoodu waxay quutaan sadex nooc oo cuntao ah (56%) hase ahaatee, tiro kale oo wax ku ool ahi waxay 44% maalintii laba jeer ama in ka yar ayay wax quutaan. boqolkiiba afartan qoysaska la qiimeeyay waxa lagu soo waramay in ay adeegsadaan qorshaha la tacaalida xaaladaha ba'an sida inay xubnaha qoyska qaarkood u diraan inay martiyaan reeraha kale ama ay ku tiirsanaadaan raashin deeq ah oo ay ka helaan bulshada ama tolkood.

halka xaaladda nafaqada ee xoolo-dhaqatada gobolada waqooyi-bari ay tahay heer la aqbali karo iyadoo ay jirto halista ay ku sii xumaan kartaa marka la eego saamiga qorshyeyaasha ku talo galka la tacaalida xaaladaha ba'an. dadaalada lagu taageerayo dadkani waxay wax ka tari doonaan in xaaladu aanay faraha ka bixin.

**Xaaladda nafaqo ee Jubbada Hoose iyo Dhexe**

Falanqaynta dhafan ee FSNAU Gu'ga 2010 ka dib waxay muujinaysaa in xaaladda nafaqo ee bulshda ku dhaqan daafaha wabiga Jubba ay **aad u Ba'antahay** taas oo sabab looga dhigayo hubantida cuntada qoyska oo liidata awgeed. goobaha caafimaadka iyo xarumaha quudinta xogta laga helayo ayaa haatan muujinaya in ay sarrayso balse ay isa soo dhimayso tirada carruurta aadka u nafaqada daran sadexdii bilood ee u danbeeyay. helitaanka badan ee kalluunka, khudarada iyo khudrada cagaaran iyo firilayda soo go'day xili danbeedka iyo marka lagu daro helitaanka shaqaalaha beero falida oo kordhay iyo iskii ui shaqaysiga ayaa hagaajiyay fursadaha shaqo helista . Helitaanka dib u dhaqaalayn dheeraad ah carruurta aadka u nafaqada daran iyadoo la marinayo barnaamijyada daaweynta iyo daryeelka ee goobaha caafimaadka (stabilization center and out-patient therapeutic care) ayaa iyaguna gacan ka gaystay soo kabashada carruurta.

Xaalada nafaqo ee xoolo-dhaqata iyo beeralayda iskudhafani weli waa **Halis** ilaa mid **Ba'an** waa siday u kala horeeyaane, sida lagu warbixiyay Gu'ga 2010. helitaanka adeegyada caafimaad, fayo dhawrka iyo biyaha nadiifta ah; gargaarka aadamenimo oo yaraaday, dhimashda carruurta oo korodhay iyo daryeelka nafaqo ee carruurta oo hoos u dhacay ayaa xaalada aad wax u sii yeelay . xaaladda baahida nafaqo ee dhamaan meelaha qiimeynta waxay u baahan yihiin in lala socdo, hadbana la qiimeeyo siday u qorshaysantahay in la sameeyo Diisambar 2010 (shaxanka 8)

# FALANQAYNTA ISKUDHAFAN EE XAALADDA HAYSASHADA CUNTADA

## MAGAALOOYINKA

Falanqaynta haatan, oo inta badan ku salaysan xogta laga helo suuqyada ee bishiiba mar la soo ururiyo,[1] may muujinin wax isbeddel muuqd ah oo ku dhacay xaga hubantida cuntada ah ilaa xilli warbixineedkii hore (Janaayo -Juunyo 2010). waxa jira waxyaabo muujinaya in hubantida cuntada ee gobollada shabeelle iyo Jubba ay ka soo raynaynays intii u dhaxaysay Luulyo-Sebteembar iyo awoodda wax-iibsiga dadka oo ka soo roonaatay iyadoo qiimaha firilayda ay hoos u dhacday iyo korodhka mushqaayada muruq-maalka awgood. Sidoo kale, heerka qiimaha maciishada ayaa isna hoos u dhacay, qiimaha hadhuudhka ee labada gobol oo hoos u dhacay awgii. hase ahaatee, wax isbedel ah lagama dareemin qaybaha kale ee dalka xaaladuna waa iska sidii ay ahayd ee lagu sheegay warbixintii falanqaynta Gu'ga 2010 ka dambeysay. hase ahaatee, heerka sicir bararka ee badeecadaha aasaasiga ah ayaa sarreeya marka la bar bar dhigo intii salka u ahayd bishii Maarso sanadkii 2007 (97-127% meelaha shilin soomaaliga lagu ganacsado). Ammaan darrada, xiisadaha iyo gargaar aadamenimo oo ku yaraaday koonfurta iyo badhtamaha dalka ayaa wali hakinaya helida cuntada in badan oo ka mid ah dadka saboolka ah ee magaalooyinka ku nool (230,000 **AFLC** iyo 80,000 **HE** wixii ka danbeeyay Gu'ga 2010)


***Qiimaha Maciishada ee Saboolka Magaalooyinka ku Nool***

Heerka sicir bararku wuxuu yar kordhiyey kharashka u yar ee nolosha (CMB) ilaa Juunyo 2010 dhamaan gobollada dalka, waxaanad moodaa inuu mudadaas joogto ahaa marka la bar bar dhigo sanadkii hore (Sebteembar 2009) (eeg qaybta suuqyada). korodhka sicir bararka waxa inta badan uu saameeyay koru kaca qiimaha cuntooyinka aasaasiga ah ee kharashka u yar ee nolosha; sida hadhuudhka, burka, sonkorta, saliida iyo caanaha oo marka la isku wada daro noqonaya 45-68% ee kharashka u yar ee nolosha (CMB). Iyadoo hadhuudhku yahay ka ugu badan (25-37%) CMB. guud ahaan, korodhka CMB ee soomaaliya intii u dhaxaysay bilihii Juunyo iyo Sebteembar 2010 waxa uu u dhigmayay 1-8% marka lagu qiimeeyo lacagta dalka. hase aahaatee, marka lagu qiimeeyo Doolarka korodhka dhamaan wuu ka wada jiraa gobollada (waqooyi galbeed-17%; badhtamaha-28%; koonfurta-22% iyo waqooyi bari-20%) taas oo ay sabab u tahay qiimaha dollarka oo hoos u dhacay iyo sarifka lacagahaha dalka oo xoogaystay. Gobolka ugu sareeya CMB ee xaga Doolarka waxa lagu sheegay inuu yahay Waqooyi Galbeed oo ah inta u dhiganta SISh 849,000 (US$ 140) gobolka ku xiga ee maciishadiisu qaaliga ahayd bishii Sebteembar 2010 waa waqooyi bari oo uu taagnaa SoSh 3,870,000 (US$111) waxa soo raaca badhtamaha oo SoSh 3,206,000 (US$93). halka ugu maciishada jabani waxa weeye koonfurta (SoSh 1,950,000 ama US$ 57) marka la bar bar dhigo gobolada kale ee la eegay baaxaa dega qiimaha ilaa Juunyo 2010. qiimaha maciishada ee sareeya ee Waqooyi Galbeed wuxu muujinayaa heerka nololeed ee sarreeya ee gobolkaa marka la bar bar dhigo qaybaha kale. hase ahaatee, waqooyi bari iyo badhtamaha heerka sarreeya ee CMB (lagacta dalka marka lagu qiimeeyo) iyo qiimaha hadhuudhka ee kacay marka la eego wuu sarreeyaa sababtuna waxa weeye qiimaha daabulka firilayda oo kor uga kacay oo ka yimaada koonfurta.

***Helitaanka Shaqada Muruq-maalka, Xaddiga Mushqaayada/Ujuurooyinka iyo Awoodda Wax-iibsiga***


Shaqada dhismaha iyo xammaalida ayaa ah kuwa ugu badan ee dadka saboolka ah ee magaalooyinku dakhli ka helaan. helida shaqooyinka mururqmaalka ahi waxay ahayd dhex dhexaad mudadii Luulyo-Sebtaambar iyodoo ay sidoo kale ka midaysynaayeen meelaha daabiyadaha ah ee dalka oo dhan. qiimaha mushqaayada muruq-maalku wuu kordhay Sebteembar 2010 ee inta badan gobolada dalak marka la bar bar dhigo qiimihii Juunyo 2010 iyo Sebtaambar 2009. keliya qaybo ka mid ah badhtamaha dalka (Galgaduud iyo qaybo Mudug ah) ayuun bay qiimaha mushqaayada muruq-maalku ay caadi ahaayeen ama ay yar hoos u dhaceen ilaa bishii Luulyo 2010, sababta ugu waynina ay ahayd colaadaha soo noq noqonaya ee khalkhaliyay hawlihii suuqa iyo ganacsiga. hase ahaatee, qiimaha mushqaayadu wuxu kordhay inta u dhaxaysa 20-30% marka la bar bar dhigo sanadkii hore (Sebtaambar 2009) suuqa ganacsiga xoolaha ee hagaagay awgii iyo xoolaha dammaanka ah oo kordhay oo helay roobab fiican Gu'gii iyo xayiraadii ay xoolaha soomaalida oo ay ka qaadeen dawladaha gacanku sanadkii hore (Oktoobar 2009) meelaha kale oo ay ka midyihiin Shabeelle (29%) gobollada hadhuudhku/massagadu ka baxo (18%) iyo waqooyi galbeed (20%) laakiin uu hoos u dhacay Jubba (13%) iyo bari oo xasillaa (2%). mushqaayad maalmeedka muruq-maalka way kala duwanayd dalka oo dhan iyadoo ku xidhan kolba nooca shaqada muruq-maalka ah ee jirta iyo heerka nololeed ee aaggaa ka jira (shaxanka 9) mushqaayada ugu hoosaysa (marka doollar lagu qiimeeyo) waxa laga soo sheegay bishii Sembteembar xaga koonfurta (USD2.4 ilaa USD3.0) oo ah meelaha heerka noloshu hooseeyo. qiimaha xaga badhtamuhu wuxu u dhigmayay ilaa USD 2.9, marka xaga waqooyi loo sii kacana wuu kordhayay ilaa USD 3.5 waqooyi bari ah iyo USD 5.6 waqooyi galbeed ah.

**Jaantuska 9: Celceliska Ujuurooyinaka Magaalada Degaannada SoSh iyo SISh**




Qiimaha firilayda dalka ka baxda (hadhuudhka iyo gallayda) waxa ka muuqday baaxaa deg ilaa luulyo-Sebteembar 2010. qiimaha firilayda hoos buu u dhacay magaalooyinka koonfurta (Jubba iyo Shabeelle) xaga waqooyi galbeedna dalaga badan ee soo go'ay awgii xilliga Gu'ga iyo sidoo kale wax soo saarka xiligii Dayrta (2009/10). hase ahaatee qiimaha firilaydu wuu sareeyaa badhtamaha (6%) iyo gobollada hadhuudhku ka baxo (4%) halka inta kale ee waqooyi bari uu xasiloonaa mudadaas. korodhka qiimaha firilayda ee gobollada hadhuudhku ka baxo waxa u sabab ah dalab badan ee hadhuudhka ee ka jira gobollada badhtamaha iy waqooyiga iyo cuntada caawimada ah oo ku yaraatay gobolladaa. korodhka qiimaha hadhuudhka cas ee gobollada dhexe waxa u sabab ah inta badan colaada ka aloosan taas oo badh ahaan hakisay isku socodkii ganacsiga raashinka. bishii Sebteembar 2010 celceliska qiimaha hadhuudhka ee shilin soomaaligu meelahaa wuxu ka ahaa 8,200(gobollada hadhuudhku ka baxo)ilaa 15,000 (waqooyi bari). qiimaha hadhuudhku waxa uu u dhigmaa SISh 2,450 waqooyi galbeed. bishii Sebteembar 2010 ayaa qiimaha hadhuudhka casi ugu hooseeyay gobolka Baay oo uu gaadhay SoSh 5,250 Baydhaba iyo SoSh 4,800 Diinsoor. dhanka kale, qiimaha hadhuudhka ee ugu sarreeya oo ah SoSh 17,000 waxa laga soo sheegay Boosaaso (Waqooyi Bari).

**Jaantuska 10: Iskubeddelashada Massagada iyo Maalingoosiga ee Magaalooyinka**




Heerarka ToT ee iskubedelka mushqaayada shaqaalaha maalinlaha ah iyo firilaydu wuu ku kala duwanaa gobolada bilihii Luulyo-Sebteembar 2010. Heerka iskubedelka ganacsigu (ToT) wuxuu ahaa mid si joogtaysan u socday inta badan magaalooyinka dalka. Hayeeshee, gobolada Juba iyo shabeelooyinku way ka duwanaayeen, wuxuu si aad ah u kordhay Shabeelle (100%) iyo si meel dhexaad ahna Jubba (36%). korodhkan waxa lagu sababeeyay hoos u dhaca qiimaha gallayda ee suuqyada magaalooyinka waawayn (43% Shabeelle iyo 25% Jubba), iyo sidoo kale korodhka qiimaha mushqaayada muruq-maalka shabeelle (11%) iyo Jubba (3%) waa siday

1 Ilaa Maarso 2008 markii sicirbarabrka ba'ani bilaabmay Abril 2007, FSNAU waxay waday qiimeyn rubuc sanadeedle ah oo ay ku qiimeynaysay saamaynta qiimaha kacaya ay ku jeelanayaan bulshda ku dhaqan magaalooyinka iyo helitaanka cuntada. ilaa haatan FSNAU waxay dhamaystirtay 10 qiimeynood oo rubuc sanadedle ah oo ay ka fulisay magaalooyinka Soomaaliya. iyadoo tixgalinaysa hoos u dhaca muuqda ee sicir bararka ee soo bilaabmay Maarso 2009 FSNAU waxay go'aansatay in ay qiimeyntii rubuc sanadleaha ahayd ee magaalooyinka u badasho labadii sanadoodba mar iyo inay samayso qiimeyn xilliyeed meelaha miyiga ah.

u kala horeeyaane. xaga koonfurta celceliska heerka- Isku-bedelka Ganacsiga (ToT) bishii Sebteembar wuxuu u dhigmayay 12kg oo hadhuudh ah hal yoomiyad ama maalin goosi magaalooyinka gobollada hadhuudhku ka baxo iyo 14-15kg oo gallay ah hal yoomiyad magaalooyinka gobollada shabeelle iyo juba. xaga badhtamaha, waqooyi bari iyo waqooyi galbeed heerka isku bedelka Ganacsiga (ToT) isku doorsiga shaqada muruq maalka yoomiyadiisa iyo bariisku bishii Sebteembar wuxuu u dhaxeeyay 3kg ee gobolada badhtamaha ah ilaa 5-6kg oo Gobolada waqooyiga ah, halka heerka ToT hadhuudhku ahaa 8kg, 7kg iyo 13kg waa siday u kala horreeyaane (shaxanka 10).

## MIYIGA

***Gobollada koonfureed***

Xaaladda hubantida cuntada ee gobollada koonfurtu way soo hagaagaysay mudadii Luulyo-Sebtembar 2010. tilmaameyaasha ugu muhiimsani waxay muujiyeen in ka soo raynta xaalada ay ka mid yihiin qiimaha hoos u dhacay ee firilayda ka soo baxday gobollada Jubba, Shabeelle, Baay iyo meelo badan oo ka mid ah Gedo roobabkii xiligii Gu'ga awgii iyo dalagyadii ka soo go'ay daafaha wabiga juba; korodhka qiimaha mushqaayada muruq-maalka iyo shaqada oo badatay taasoo ay keentay baahida gudashada hawlaha xilliga dheeriga ah, horaanta beer falashada xilliga Dayrta iyo ganacsiga xoolaha . Qiimaha xoolaha waxaa hagaajiyey suuq geyntii xoolaha oo kordhay iyagoo muuqaal iyo hilib ahaanna xaalad wanaagsan ku sugnaa taasoo ay ugu wacnayd Gu'gii2010 oo roobabkiisu ay fiicnaayeen iyo xilliga xagaaga oo roonaa ;xagga daaqa iyo biyahaba. Hoos u dhaca qiimaha firilayda iyo qiimaha xoolaha ee hagaagay waxay xoojiyeen awoodda wax-iibsiga ee qoysaysyka taas oo muujinsayna in heerka (ToT) isku doorsiga daabaxa ariga iyo firilaydu oo kordhay oo gaaray inta u dhaxaysa (30-95% bilihii Luulyo-Sebtembar 2010).



*Bariis Hore Loo Abuurey. Shabeellaha Dhexe, FSNAU, Oktoobar 2010*

Heerka (ToT) ee isku doorsiga shaqada muruq-maalka maalinlaha iyo firilaydu sidoo kale wuu hagaagay ilaa Juunyo 2010 gobolada Koonfurta badankooda ka dib markii qiimaha firileyda uu hoos u dhacey isla markaana ay kor u kaceen ujuurooyinka murug-maalka. Haddii si gaar ah loo magacaabo, isku doorsiga ujuurada muruqmaalka iyo firilleyda ayaa kor u kacdey gobollada Shabeelle (143%), Baay (11%), Webilleyda Jubba (83%) iyo Hiiraan (21%). haseyeeshee, gobolka Hiiraan ayaa iskubeddeleshadu hagaagtey waxaa wax-laga-saari karaa ujuurooyinka muruq-maalko oo si weyn u kordhey (41%) taasna ay sabab u tahay hawlaha ganacsiga xoolaha ee kordhey mowsinka Xajka, taas oo dheellitirtey ama baajisay saameyntii ku lamaansanayd ee korodhka qiimaha firilleyda ee ka dhacay gobollada (21%). Walax-isweydaarsiga ganacsiga ayaa ahayd mid aan isbedelin oo joogtaysan gobollada Gedo iyo Bakool bilihii Luulyo-Sebtembar 2010. haseyeeshee, koonfurta Soomaaliya ayaa weli ay ka jiraan iskahorimaadyo, taas oo halis weyn ku ah hubinta cuntada iyo hubinta hab-nololeedka ee gobolladaas. Dagaalka Muqdisho, Hiiraan (Baladweyne), Bakool (Rabdhuurre iyo Ceel Berde), Jubbada Hoose (degaanka Dhoobley) iyo Gedo (Beled Xaawo) ayaa socda, taas oo keenay kororka barokaca dadka ee meelaha xudddunta u ah iskahorimaadka, khalkhal ku yimaada hawlaha ganacsiga, suuq-geynta iyo hawlaha kale ee dhaqaalaha.

Bulshooyinka webi ku noolka ah ee Jubba, oo loo aqoonsadey in ay yihiin **HE** (15,000 AFLC iyo 38,000 HE) qiimeyntii FSNAU ee xilliga ka dambeeya *Guga* 2010ka taasna ay sababtey dalagyada oo waxyeello weyn ka soo gaartey fatahaadihii ba'naa ee dhacay bishii Maajo 2010ka, ayaa si weyn ay u soo wanaagsanaatey xaaladda hubinta cuntada iyo tan nafaqada ka dib dalaggii xilli dambeedka ee soo go'ay bishii Sebtembar 2010. Galleydii xilli-dambeedkaas soo go'day (7,300MT), oo la mid ah 81% celceliskii galleydii Gu'ga laga soo saarey Webilleyda Jubba (1995-2009), ayaa si weyn wax uga tartey ama soo guday dalaggii baaqdey Gugii 2010kaa. Kororka galleyda soo go'dey xilli-dambeedkaas ayaa wax ka tartey in uu qiimaha galleyda hoos u dhaco (5,262SoSh/kg bishii Sebtembar 2010)boqolkiiba 35 ee deegaan nololleedka webiga Jubba tan iyo bishii Juunyo 2010 (eeg waaxda Beeraha). Intaa waxaa dheer, in heerarka ujuurooyinka muruq-maalka ay kordheen 12% isla muddadaas (min 101,125SoSh/maalin-goosigii oo uu gaarey 113,750 SoSh/maalin-goosigii) taasna waxaa sabab u ahaa baahida loo qabey shaqaalaha oo aad u korordhey muddadii ay socdeen hawlaha beeraha ee xilliga dheeriga ah. sidaa daraaddeed, isweydaarsiga muruq-maalka iyo galleyda ayaa wanaaagsanaatey 83% marka la barbar-dhigo heerarkii ay joogtey Juunyo 2010, taas oo ahayd 22kg oo galley ah maalin-goosi bishii Sebtembar 2010, waxaana ay 5% ay ka sarreeysaa marka la barbardhigo heerarkii Sebtembar 2009kii. Qiimaha nolosha ayaa sidoo kale hoos u dhacdey 12-17% Kharashka ugu yar ee nolosha (CBM) intii u dhaxeysey Juunyo ilaa Sebtembar 2010 degaannada webiga Jubba ee bulshooyinka ay fatahaaduhu saameeyeen (Saakow, Jilib, Bu'aale, Jamaame).

In kasta oo ay soo wanaagsanaadeen tilmaamayaasha hubinta cuntada iyo sidoo kalena ay soo wanaagsanaatey xaaladda nafaqada muddad warbixintan (Luulyo - Oktoobar 2010), wejiga **HE** ee webilleyda Jubba ee lagu ogaadey baaritaankii xilligii ka dambeeyey Guga 2010, ayaa sideeda ahaan doonta ilaa dhammaadka sanadkan. Wejigii hubinta cuntada ayaan waxba iska beddelin waayo waxaa jirey arimo hadimooyin ah oo soo fool leh oo kala duwan, kuwaas oo si fudud wax ugu dhimi kara xaaladihii bilihii la soo dhaafey soo roonaadey. arimahaas halista ah waxaa kalo ka mid ah hubaal la'aan ka jirta sida ay noqon doonto *Dayrta* iyada oo la tixgelinaayo xaaladd *La Niña* ee la saadaaliyey, oo haddaba ay ka muuqatay sida roobabka Dayrtu ay uga daaheen deegaan nololleedada iyo hoos u dhaca heerka biyaha wibiyada. Sidoo kale, degganaan la'aanta nebedgelyo ee sarreysa ee ka jirta gobolka iyo xaaladda ammaanka oo la soo sheegey in ay ka sii dareyso gobollad la deriska ah, kuwaas oo laga yaabo in ay saameyn ku yeeshaan suuqa iyo wax is-dhaafsiga ganacsiga, dhaqdhaqaaqa xoolaha oo ayna keenaan barokac kale.

***Gobollada Dhexe***

Xaaladda hubinta cuntada ee degaannada Daaqsatada ah ee Hawd iyo Adduun ayaa sii wanaagsanaaneysey tan iyo markii ay da'een roobabkii Gu'ga ee lagu diirsadey, iyada oo xoolaha araggooda ahaa mid wanaagsan taasna ay keentey helidda baad iyo biyo. Haseyeeshee, degdeg uga soo kabashada saameyntii ay reebtey abaarihii hore ayaa waxaa caqabad ku noqdey hadimooyin badan, oo ayka mid yihiin dadka oo ku xoolo iyo hanti beeley lixdii xilli ee isku xigey ee ay roobabku baaqdeen, sicir barar cirka isku shareerey iyo ammaan darro. haseyeeshee, xaaladda Xeebleyda *Deex* iyo soohdinta digirta (Cowpea Belt) oo roobabkii Gu'ga 2010ka ay ku yaraayeen ayaan muujin wax ka soo reyn ah. Intii ay socotey qiimeyntii/daraasaddi xilliga Gu'ga 2010 ka dambeysey, ayaa FSNAU ay ku soo warbixisey jiritaanka 22,000 xoolo-dhaqato cayroobey ah, kuwaas oo hab-nololeedka xoolo-dhaqatanimada u joojiyey xoolihii oo ka dhammaadey, ilihii dakhliga ka soo geli jirey oo meesha ka baxay iyo tabaha la-tacaalidda nolosha oo gabaabsi noqday ee ay ku soo meel mareen lixdii xilli abaareed ee isku xigey (2007 - 2009). dadkan xoolahoodii ka soo hoydey waxay soo galeen tuulooyinka iyo magaalooyin iyagoo cooshado iyo aqal soomaliyo isku xoonsan ka degey dulee-dada magaalooyinka. iyaga oo raadinaya ilo kale oo ay ka helaan cunto iyo dakhli.



*Dhul Daaqsin Wanaagsan Leh. Dooxad Dharoor, Iskuhuban, Bari, FSNAU, Oktoobar 2010*

warbixinta kooban ee gobollada

Muddada warbixintan gudaheeda, ayaa gobollada dhexe ay haddana mar kale dhibaato ka soo gaartey ammaan-darrada sii xumaatey, iyo sidoo kale kororka qiimaha cuntada dibadda laga soo dejiyo sida sonkorta (9-14%, burka (11-12%), bariiska (3-21%) iyo saliidda cuntada (3%) marka si guud loo eego (eeg Qaybta Suuqyada). Intaa waxaa u sii dheer, in qiimaha firilleyda dalka ka soo go'da uu sidoo kale kor u kacay (qiimaha masagada/hadhuudhka ayaa kor u kacay 6-19%) taas oo ay sabab u tahay yaraanta helitaankooda taas oo ka dhalatey markii aaney dalagyo ka soo go'in gobollada Dhexe iyo Hiiraan iyo sidoo kale iskahorimaadyada xoogeystey ee khalkhalka geliyey ganacsiga iyo wax is-dhaafsiga suuqa. Isla muddadaas, qiimaha ariga jarka ah ee degaanka ayaa kor u kacay 13% taasna waxaa u sabab ah xoolaha loo ururinayey Ramadaanta iyo Xajka, taas oo keentey in uu kordho qiimaha la isku dhaafsado ariga jarka ah ee degaanka iyo bariiska (17% oo uu ka ahaa Dhuusamarreeb; 17% oo uu ka ahaa Gaalkacyo).

Hawd iyo badi dhulka Adduun, ayaa looga soo warrmey in ay xoolo badani ku dhaleen, taas oo weli la filayo in ay sii badato bisha Nofembar, tani waxa ay ka qaybqaadaneysaa in caano fiican lagu helo degaanka. Haseyeeshee, Xeebleyda Deex iyo soohdinta digirta laga beero (*Cowpea Belt),* ayaa laga filayaa in lo'du u dhalin ama ay wax yar u dhalaan Deyrta 2010/11-ka taasna waxaa u sabab ah biyaha iyo baadka oo ku yaraa, taasna waxa ay keentey in xooluhu caatoobaan uuna hoos u dhacaan tirada xoolaha rimaya. Sidaa daraaddeed, caanihii lo'da iyo kuwii geela ayaa ku yaraadey degaannada *Cowpea Belt* iyo Xeebleyda Deex (Xarar Dheere iyo Ceel Dheer) waxaana kor u kacay qiimaha caanaha geela intii u dhaxaysey Juunyo iyo Sebtembar 2010ka.

Gobollada dhexe wax roob ahi kama di'in xilligii Xagaaga oo dhan, taasna waxa ay keentey in ay dhammaadaan biyii berkadaha waxaana socdey biyo dhaamin ilaa Agoosto 2010kii. Qiimaha hadda la kala siisto biyaha waxaa uu u dhigmaa SoSh7,000 - 8,000 jiirgaankii 20litir-laha ah, qiimahaas oo ah mid 150% ka sarreeya qiimihii caadiga ahaa. Qiimaha biyaha ayey u badan tahay in uu kor u sii kaco maaddaama ay daaheen curashadii roobabka Deyrta in ka badan tobaneeyo maalmood, waxaana degaanka bartamaha dalka ka socda dhaqdhaqaaq weyn oo xoolaha lagu geedi gelinayo .

***Gobollada Waqooyi***

Xaaladda hubinta cuntada ayaa soo wanaagsanaatey intooda badan degaannada daaqsatada iyo kuwa daaqsatada iyo beeraha iskudhafan tan iyo Gu'gii 2010ka taasna waxaa keeney saameyntii waxtarka ahayd ee ay reebeen roobabkii Gu'gii la soo dhaafey ee wanaagsanaa, oo ay ka dambeeyeen roobab Karan ah oo iyan fiicnaa iyo roobabkii Deyrta oo waxyar soo hor marey oo da'ay Sebtembar 2010ka. Roobabka ayaa si wanaajiyey biyaha iyo baadka, xaaladda xoolaha iyo caanaha la helayo, waxaana ay keeneen in dalag wanaagsani uu ka soo go'o degaannada beereladeyda iyo daaqsatada iskudhafan ah ee gobollada Togdheer, Awdal iyo Waqoyi Galbeed. Firilleyda ka soo go'dey (79,000MT) degaannada beeraleyda iyo daaqsatada iskudhafan waa tii ugu badneyd tobankii sano ee ugu dambeeyey, taasna waxa ay keeneysaa in ay xoojiso helitaanka cuntada ayna wanaajiso helitaanka firilleyda degaanka ka soo go'day. Waqooyi Bari, ayaa ay xaaladdu xoogaa soo wanaagsanaatey markii roobab kooban oo dhexdhexaad ahi ay ka da'een meelo ka mid ah degaannada Bariga Golis iyo Dharoor oo ka tirsan gobolka Bari iyo Hawd oo ka tirsan gobollada Nugaal iyo Mudug, waxaase ay ka sii dareysaa xaaladdda Dooxada Nugaal, Soolka Kore ee gobollada Sanaag iyo Sool, dhul daaqsimeedka Addun iyo Xeebleyda Deex taasna waxaa u sabab ah xaaladaha abaareed ee ka jira.



*Riyo Miisaankoodu Dhexdhexaad Yahay iyo Daaqsin Aan Wanaagsaneyn. Lasa'adale, Gaalkacyo, Mudug, FSNAU, Oktoober 2010*

Badi dhulka gobollada waqooyi ayaa xaaladaha daaqu waxa ay isugu jiraan kuwa dhexdhexaad ah ilaa kuwo xun. Meelaha kooban ee heley roobab dhexdhexaad ah waxaa u soo guurey xoolo badan, kuwaas oo culays ku noqdey cawskii/calafkii dib u soo dhalan lahaa. Helidda biyaha ayaa ah mid dhexdhexaad ah degaannada ay roobabku ka da'een, halka ay liidato degaannada ay roobabku ku yaraayeen. Biyo yaraan ayaa laga soo sheegey Soolka Kore, Dooxada Nugaal iyo meelo kooban oo ka mid ah Bariga-Golis/Gagaab. Hasyeeshee, waxaa la filayaa in ay korodho tirada adhigu (ido Iyo riyo) iyadoo laga qiyaasaayo tirada sida ama dhalaysa ee deyrta ku aadan oo ah mid dhexdhexaad ah ama sarraysa maaddaama ay gugii 2010 si wanaagsan u rimeen.. Haseyeeshee, geela dhalaya Dayrtan ayaa la filayaa in uu yar yahay badi habab-nololeedyada kala duwan maaddaama geelu u badnaa Gu rin 2010. Haseyeeshee, waxaa sidaas ka duwan dooxada Nugaal ee gobolka Sool halkaas oo la filayo tiro dhexdhexaad ah oo geeli ahi ay dhalaan inta u dhaxaysa Disembar 2010ka iyo Jannaayo 2011ka. Wax so saarka caanaha geelaha ayaa ka hooseysa celceliskii caadiga ahaa dhammaan habab-nololeedyada kala duwan taasna waxaa u sabab ah geela dhaley guud ahaan sanadkan 2010 oo yar. Haseyeeshee, wax soo saarka caanaha ariga ayaa ah mid caadi ah dhammaan habab-nololeedyada kala duwan.

Iyada oo ay u sabab tahay kororka tirada ari cadka la iibinayo mowsinkan Xajka, ayaa qiimaha ari cadka tayada la dhoofinayo iyo tan gudahaba (ahmin iyo Daabax) ay hoos u dhaceen Waqooyi-Galbeed (4-15%) intii u dhaxaysey Luulyo-Sebtembar 2010ka. Haseyeeshee, suuqyada Waqooyi-bari ayaa qiimaha ari cadka dhoofka ahi uu ahaa mid aan isbedelin tan iyo Juunyo 2010ka, iyada oo celceliska qiimaha caadiga ah ee ari cadka tayada gudaha (daabaxa) uu hoos u dhacay ilaa 7%. Qiimaha wax is-dhaafsiga/iskubeddelashada (ariga iyo bariiska) ayaa hoos u dhacay intii u dhaxaysey Juunyo iyo Sebtembar 2010 ilaa 17% taasna waxaa keeney qiimaha bariiska oo kor u kacay taasna ay ka dhalatey bariiska yaalla suuqyada oo yar iyo qiimaha bariiska ee suuqyada caalamka oo kor u kacay. Haseyeeshee, qiimaha isdhafsiga ganacsiga ayaa si intaa ka badan hooso ugu dhacay 24% marka la is-dhaafsanayo ari cadka tayada gudaha(daabaxa) iyo firileyda ee gobollada Waqooyi-galbeed isla muddadaas taasna waxaa u sabab ahaa laba arrimood oo wada socdey oo ah iibinta xoolaha oo yaraadey iyo qiimaha bariiska oo kordhey. Haseyeeshee, is-dhaafsiga ganacsiga ee muruq-maalka maalingoosiga iyo massagada/hadhuudhka cad ee degaannada laga isitcmaalo SlSh ayaa kor u kacay 17% (14Kg massago/hadhuudh) ah tan iyo Juunyo 2010ka taasna waxaa u sabab ah qiimaha massagada/hadhuudhka oo hoos u dhacay ka dib markii si weyn looga keeney Koonfurta oo ay sidoo kalena ka soo go'dey degaanka.

**Qoraallo dhowaan la baahin doono iyo kuwo la sii deyn doono**

*Warbixinta Nafaqada ee FSNAU, Sebtembar-Oktoobar 2010*
*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSNAU/FEWSNET, Oktoobar 2010*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSNAU/FEWSNET, Oktoobar 2010*
*Warbixinta Farsamo ee Joogtada ah ee FSNAU ee Xaaladda Nafaqada, Sebtembar 2010*
*Warbixinta Farsamo ee Joogtada ah ee FSNAU ee Lafagurka Xilliga Ka Dambeeya Gu'ga 2010, Sebtembar 2010*

*Ogow: qoraallada waxaa laga helaa shabakadda FSNAU: www.fsnau.org*

Technical and Managerial Support

Funding Agencies